# Qoraalo ku saabsan
# Baadhista maamagaraamka



## Ku soo dhawow BaaristaNaaska ee Kilinikada WA (BreastScreen WA) …

Fadlan akhri macluumaadkan muhiimka ah oo ku saabsan baarista maamagaraafka waxaadna buuxisaa foomka ogolaanshaha ee halkan ku xiran KAHOR maamagaraamkaaga. Haddii aad qabto wax su'aalo ah shaqaalaha ka shaqeeya qaybta baarista ayaa ku caawin kara. Fadlan ogsoonow inaad waqti kasta joojin karto baarista.

### Wax ku saabsan barnamijka baarista naaska

Ujeeddada barnaamijka baarista naaska waa in la yareeyo dhimashada loo dhinto kansarka naaska. Maamagaraam (raajada naaska) waa habka ugu fiican oo waqtigan la haysto oo lagu ogaan karo kansarrada naaska marka ay yar yihiin in la dareemo. Hore u sii ogaanshaha kansarka naaska waxay keenaysaa fursadda wanaagsan ee daawayn guul leh.

Xoogsaarista barnaamijka Baarista naaska ee WA waa hore u sii ogaanta kansarka naaska. Isbaddallada lagu arko maamagaraamkaaga kuwaas oo aan loo qaadan inay calaamad u yihiin kansarka naaska lama soo gudbiyo.

Caddaynta caafimaad ee hadda jirtaa waxay muujinaysaa in baaristu ay aad ugu waxtar leedahay haweenka da'doodu 50-74. Fursaddaada inuu kugu dhaco kansarka naasku waxay la korortaa da'da. Badiba 70% ee kansarada naasku waxay ku dhacaan haweenka kuwaas oo da'doodu tahay 50 ama ka weyn. Maamagaraamyada baarista oo joogto ah waxay yarayn kartaa dhimashooyinka ku yimaada haweenkaas 30%. Waxtarka baarista Maamagaraafka waxay ku yar yihiin haweenka ka yar 50.

### Sidee loo qaadaa maamagaraamka?

**Waxaa lagaa codsan doonaa inaad dharka ka qaaddo ilaa xudunta waxaana lagu siinayaa gown aad gashato. Raajo-yaqaan haween ah oo si gaar ah u tababaran ayaa qaadi doona Maamagaraamka.**

Inta la qaadayo maamagaraamka naaska waxaa lagu riixaa ilaa dhowr ilbiriqsi si loo helo sawir waadax ah. Tani waxay noqon kartaa mid aan raaxo lahayn.

Badanaa laba sawir ayaa laga qaadaa naas kasta, hase ahaatee mararka qaarkood intaas ka badan ayaa loo baahan karaa.

### Kumaa akhrinaya maamagaraamka?

**Natiijada maamagaraamkaaga waxaa lagu salayn doonaa heshiis u dhaxeeya ugu yaraan laba dhakhtar takhasusleyaal ah (raajo-yaqaano) kuwaas oo waayo-aragnimo fiican u leh akhriska maamagaraamyada. Dhammaan maamagaraamyada waxaa loo akhriya si kala madax-bannaan. Mararka qaarkood, haddii labada raajo-yaqaano ee kowaad aysan is-waafaqin, raajo-yaqaan saddexaad ayaa akhrin doona maamagaraamkaaga.**

#### Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo raajo laygu celiyo?

Marmar dhif ah ayaa raajo yaqaanku codsan doonaa ku-celin raajadii haddii sawirkii la soosaaray uusan si fiican u muuqan. Haddii ay sidaas lagama maarmaan noqoto waxaad helaysaa wicitaan taleefan ama warqad kaa codsanaysa soo-noqosho. Raajooyinkan ku-celinta ah waxaa laga samayn doonaa kilinikada baarista.

### Ogaysiinta natiijooyinka

**Badiba haweenka warqad ayaa lagu ogaysiinayaa 14 beri gudahooda in wax kastaa wanaagsan yihiin. Waa wax iska caadi ah in haweenka dib loogu yeero baaritaano dheeraad ah. Haddii taas loo baahdo, kalkaaliyaha qiimaynta naaska oo ka socda**

**BaaristaNaaska WA ayaa taleefan kugu soo wacaya si ay kaala hadasho arintaas adiga. Badanaa, baaritaanadan ma muujinayaan wax dhibaato ah oo u baahan baaris dheeraad ah.**

Haweenka kuwaas oo lagu baaray meelaha magaalo-weynta ah waxaa ballan laga siin doonaa xarunta qiimaynta barnaamijka halkaas oo baarista maamagaraam dheeraad ah, ama haddii loo baahdo, baarisyo kale ayaa la samayn doonaa.

Haweenka lagu baaray shaybaarka wareega ee miyiga, baarisyada maamagaraafyada oo dheeraad ah ayaa la samayn doonaa faanka wareegga dhexdiisa sida ugu dhibka yar.

**Fadlan la soco:** BaaristaNaaska WA waxay haynaysaa maamagaraamyada si loogu eego kuwii kale oo la sameeyo mustaqbalka.

### Sidee loogu kalsoonaan karaa maamagaraamka?

**Maamagaraamyadu waxay muujin karaan 90% kansarada naaska. Waxaa jira kansarada qaarkood oo aan lagu arki karin maamagaraamka. Haweenka dhalinyarada ah ama haweenka qaata Hormone Replacement Therapy waxay yeelan karaan nudaha naaska oo dumucsan marka loo eego haweenka waayeelka ah taasina waxay adkayn kartaa sidii loogu arki lahaa kansarka Maamagaraamka. Taasi waxay keenaysaa in haweenka dhallinyarada ah ay u baahdaan baarisyo dheeraad ah, oo ay ka mid tahay baayoobsiyada, sababtoo ah waxaa adag in meesha laga saaro kansarka ayadoo lagu salaynayo Maamagaraamka.**

Sidoo kale maamagaraamku waxaa dhici karta inuu marka hore u e'kaado mid lagu wareero hase ahaatee baaris dheeraad ah waxay muujinaysaa inaysan jirin dhibaato daran.

Qaadashada maamagaraamka kaama celinayso kansarka naaska hase ahaatee ogaanshaha hore waxay keenaysaa fursad fiican oo daawayn lagu guulaysto ah.

### Maamagaraamku ma leeyahay wax waxyeello ah?

**Mararka qarkood riixitaanka loo adeegsado in lagu qaado maamagaraamka waxay keeni kartaa jilicsanaanta naaska oo ku-meel-gaar ah ama muruxsanaan. Tani uma keento waxyeello muddo dheer ah nudaha naaska.**

Maamagaraam kasta wuxuu adeegsadaa shucaac qadarkiisu hooseeyo. Caddaynta hadda jirtaa waxay muujinaysaa inay jirto halis yar oo la xiriirta la kulanka shucaacaas. Faai'dooyinka baarista maamagaraamfka ayaa ka badan halisteeda.

Laguma talinayo in haweenka ka shakisan inay uur leeyihiin qaataan baaritaanka maamagaraamka. Haddii ay jirto wax fursad ah oo ah inaad uur leedahay, fadlan u sheeg miiska qaabilaadda ama raajo-yaqaanka.

### Maxaa dhacaya haddii aan hadda qabo bararka naaska ama dhibaato naaseed?

Haddii aad ka dareento barar naaskaaga dhexdiisa ah, dheecaan ka imaanayo ibta ama isbaddelo kale oo ka jira naasahaaga, fadlan u sheeg raajo yaqaanka kahor intaysan qaadin maamagaraamkaaga. Waxaa kaloo muhiim ah inaad ka aragto dhakhtarkaaga wax ku saabsan calaamadahaas xataa haddii uu maamagaraamku uu caadi yahay.

### Maxaan kuu siinayaa faahfaahinta dhakhtarkayga guud?

Si laguu siiyo daryeelka ugu fiican, dhakhtarkaaga GP-da ah wuxuu u baahan yahay macluumaad ku saabsan daryeelkaaga caafimaad. Waxaan jecelnahay inaan u dirno natiijada maamagaraamkaaga asaga/ayada. Inta u dhaxaysa maamagaraamyada, waxaa muhiim ah inaad u baarto naasahaaga si joogto ah aadna wixii isbaddallo ah warbixintooda u gudbiso dhakhtarkaaga isla markiiba. Waxaan kuu soo jeedinaynaa in naasahaaga uu si joogto ah u baaro dhakhtarkaagu.